

Somali

Hagaha waalidka

Tarbiyeynta



Wanaagsan

**Children's**  
HOSPITALS AND CLINICS

Minneapolis/St. Paul, Minnesota

Xuquuqda daabacaada ©2004 (copyright), waxaa iska leh gudiga maamula Jaamacadda Minnesota (University of Minnesota).  
Xuquuqda iyaga ayey gaar u tahay.

# Tusmada hagaha

Horudhac .....	3
Tarbiyaddu waa barasho .....	5
Arimaha guud ee waalidka	
Ilmaha yar (dhalasho ilaa 9 bilood) .....	7
Koritaanka iyo tarbiyeynta	
Kalsoonni helida waalidka	
Marka ilmuuhu ooyaan	
Ilmuuhu marna habeynkii oo dhan ma seexdaan?	
Ilmaha roon (9 bilood ilaa 2 $\frac{1}{2}$ sano) .....	15
Koritaanka iyo tarbiyeynta	
Wax kasta qabsanaya	
Baridda cunugu inuusan wax taaban	
Tababarka xanaaqa	
Wuxuu u qabaa inuu isagu taliyo	
Qaniinyada	
Tababarka musqusha	
Wax qeybsiga	
Hal waalid doorasho	
Wax wasakheyn	
Aan fariisaneyn	
Caruurta roon (2 $\frac{1}{2}$ ilaa 5 sano) .....	27
Koritaanka iyo tarbiyeynta	
Dagaalka xilliga hurdada	
Hal wax keliya cunaya	
Awood sheegashada	
Isku kaadinaya	
Cabanaya	

Iskuuleyda (5 ilaa 9 sano) . . . . .	37
Koritaanka iyo tarbiyeeynta	
Marka ilmuuhu sharciga jebiyaan	
Been sheegid	
Dagaalka caruurta	
Erayada xun xun	
Kula murmaya	
Dharbaaxada . . . . .	45
Xanaaqa . . . . .	49
Waqtiga xaddidan (time out) . . . . .	51
Qeybta machuumaadka iyo akhbaar siinta waalidka . . . . .	55
Sida dhaqtarkaagu kuu caawin karo	
Qadka diirinta waalidka	
Qadka INFO-U	
Hirgelinta . . . . .	57



Minneapolis/St. Paul, Minnesota

### Waalidka qimaha lahow:

Waalidnimadu waa arin aan sahlaneyn.  
Maalmaha qaarkood waa wax wanaagsan, xiiso  
leh, isla markaana farax ku dheehan yahay.  
Maalmaha qaarna ma sahlana mana hubtid inaad  
howshaada waalidnimo qabsan karto iyo in kale.  
Waalid noqoshadu ma aha wax xun.  
Waalidnimadu waa howsha ugu muhiimsan ee  
aad weligaa qaban doonto.

Waan ognahay in waalidnimadu ahaan karto  
hawl adag. Wuxaan kaloo ognahay in caruur-  
taadu kugu weyn yihiin. Mar kasta sida aad  
dooneyso uma dhaqmaan. Hadana, marka aad  
barato sida wax loogu sheego, waxaad moodaa in  
marka ay weynaadaan ay u baahan yihiin qaab  
cusub kaas oo ah mid dhib iyo farxadiba ay ku  
dheehan yihiin.

*Tarbiyeynta Wanaagsan: Hagaha Waalidku wuxuu  
ka hadlayaa arimaha guud ee waalidka la soo  
gudboonaada marka ilmuu dhasho ilaa inta uu  
ka gaarayo bilowga dugsiga hoose. Ujeedadeenu  
waa inaan kuu sheegnaa qaababka aad u xalin  
kartid arimahaas kula soo gudboonaada, inagoo  
isticmaaleyna qaabka tarbiyeynta wanaagsan ee  
hagidda akhlaaqda ilamaha. **Buuggaan waxaa ka  
buuxa fikrado aan ognahay run ahaantii inay  
shaqeeyaan.***

Hal arrin oo aanaan marnaba ku talin doonin waa dharbaaxidda ilmaha. Waan ognahay waalidka badankiisu ma dharbaaxaan ilmaha, balse mararka qaarkood waxaad moodaa inaan wax kale shaqeyneynin. Run ahaantii, waxaa jira siyaabo kale oo ka wanaagsan oo ilmuu u baran karo sida wax loo qabto ama u muujiyo akhlaaq wanaagsan adigoo aan dharbaixin.

Waxaa muhiim ah inaad ogaato in uu jiro xiriir u dhixeyya dharbaaxada iyo caafimaadka ilmahaaga. Caruurta aan la dharbaixin waxay leeyihiin maskax fiican, isku kalsoonaan, iyo iyagoo aan aad isugu buuqin. Caafimaadka wanaagsan waa waxa aan higsaneyno. Waxaa jira macluumaad badan oo aad ka heli karto bulshada iyo degmadaada kaana caawin kara sidii aad u noqon lahayd waalid wanaagsan - meelahaas waxaa ugu muhiimsan rugta caafimaadka qoyskaaga.

Marka aad waalid noqoto, waxaan rajeyneynaa in buugaan ku siiyo fikrado iyo talooyinka aad u baahan tahay, si aad u gudato waajibkaaga waalidnimo.

Children's Hospitals and Clinics

# Tarbiyaddu waa barasho

## **TARBIYADDU WAA BARASHO**

Erayga discipline (tarbiyad) waa eray Laatiin ah macnihiisuna yahay “barid.” Marka aad waalid tahay, waxaad tahay bare/macalin. Qaabka aad u tarbiyeysuo ilmuuhu wuxuu kaa caawinayaa inay bartaan akhlaaqda.

Halkaan waxaa ku qoran saddex siyaalood oo wax loo tarbiyeeyo:

### **Kalgaceylka ilmahaaga**

Halkaani waa meesha u baahan inaad awooda saarto. Caruurtu waxay wax bartaan marka ay ogyihiin in la jecel yahay lana caawiyo. Halkaan waxaa ku qoran fikrado:

- Jeclow ilmahaaga, wax kasta oo uu sameeyo
- Dhageyso ilmahaaga
- Marka ay fiican yihiin - u sheeg
- Ka rajee ilmahaaga wanaag
- Hubi in ilmahaagu bed qabaan - muuqaal ahaan ama maskax ahaanba
- Wax san u horseed

### **Hagidda ilmahaaga**

Caruurtu waxay kaaga baahan yihiin inaad barto sida loo dhaqmo, bar sida loo maamulo dareenkooda ay mas'uuliyad u baran karaan. Waa in dhaqankooda aad sharci u dejisaa. Ilamahaagu wuxuu u baahan yahay inuu ogaado

waxa dhacaya haddii ay sharciga jebiyaan. Halkaan waxaa ku qoran fikrado :

- Ka caawi ilmahaaga sida loo xaliyo qilaafaadka
- Tus sida wax loo sameeyo
- Ka daa wixii aysan qaban karin
- Bar sida la isu dejijo
- U diyaari arimaha adag
- Dheh “haa” marka aad awoodo iyo “maya” markii loo baahdo
- Fursad u sii inay saxaan wixii qaldan

### **Sixitaanka akhlaaqda ilmahaaga**

Marka ilmahaagu si xun u dhaqmo, ugu jawaab qaab ka caawin kara sida wanaagsan ee loo dhaqmo hada ka dib. Halkaan waxaa ku qoran fikrado:

- Adigoo aan dillin, tus cinqaabta wixii qaldan ee ay sameeyaan
- Ka jooji wax loo ogolaa
- Cinqaab ahaan u sheeg in wax horey loogu ogolaa aan hada loo ogoleyn
- Haddii ay wax jebiyaan, u sheeg inay sameeyaan ama ay bixiyaan
- Isticmaal “waqt xaddidan” (time out)

**SU' AASHA WAALIDKA**

### **Muxuu yahay macnaha “cinqaab”?**

Cinqaab waa waxa ka soo baxa marka qofku qalad sameeyo. Marka caruurtu si xun u dhaqmaan, waalidku waa inay jawaab ka bixiyaan. Jawaabtaas waa in ilmshu ka bartaa waxa laga rajeynayo hadda ka dib. Haddii ilmuu darbiga guriga qalin ama midab ku haleeyaan, bar in laga sugaayo inuu nadiifiyo darbiga. Haddii ilmuu bushkaleetiga banaanka uga soo tago, hal maalin u diid inuu bushkaleetiga isticmaalo.

# Arimaha guud ee waalidka

Ilmaha yar (dhalasho illaa 9 bilood)

## KORITAANKA IYO TARBIYADDA

Ilmuu waxay dhashaan iyagoo diyaar u ah in wax la baro ayna koraan.

- Ilmuu waxay wax ku bartaan dareemid. Badanaa wax kasta oo ka agdhow, afka ayey la aadaan
- Ilmuu waxay hadalka ku bartaan dhageysasho iyo iyagoo u jawaabo dadka gacanta ku haya
- Ilmuu waa ooyaan marka ay doonayaan inay kuu sheegaan wax dhibaya
- Ilmuu waxay u baahan yihin in la jeclaado, ay bed qabaan, ayna amaan qabaan



### Sidee baan ku ogaan karaa marka aan ilmaha anshaxa bari karo?

- Mar kasta jeclow ilmahaaga. Xasuusnow, jeclaanta ilmuu ma haleyn karto
- Weligaa ilmaha ha dharbaixin ama ha ruxin
- Ka dhaqaaji meesha haddii ilmuu uu sameynayey wax aan loogu talo galin inuu sameeyo
- Waxyaalaha qatarta ah gee meel aan ilmuu gaari karin
- Haddii ilmahaagu rabo wax aan loo ogoleyn, ugu bedel wax loo ogol yahay
- Isku day inaad jadwal joogta ah sameysato maalintii
- Markii aad daasho ama arimahu kugu adkaadaan, isku day inaad biririf ama bareeg qaadato

## KALSOONI HELIDA WAALIDKA

Waqtii ayey qaadaneyaa intaadaan sahlanaan dareemin. Adiga iyo ilmahaagu waad isbaraneysaan. Ilmuu waa kala duwan yihiin. Waqtii ayey qaadataa in waalidku ogaado baahida ilmaha wax cunidiisa, hurdadiisa iyo inta uu u baahan yahay in la hayo. Ka dhig maalmahaaga sida ugu sahlan. Isku day inaad si joogto ah ula hadasho saaxiib, qof qoyskaaga ka mid ah, ama qof weyn oo daneynaya. Haddii aad dareento inaad niyadaadu aad u hooseyso, la xiriir dhaqtarkaaga, ama wac lambarada ku qoran buuggaan.



*“Dareen  
fican oo  
waalidnimo  
ayaan lahoo  
markii aan  
ilmahayga  
hada  
dhashay  
Isbitaalka  
kula jiray,  
balse markii  
aan guriga  
imid  
kalsoonidii  
ayaa iga  
dhuntay.”*

### SU' AASHA WAALIDKA

#### • Waa maxay “kalgaceyl”?

“Kalgaceyl” waa dareenka waalidka iyo caruurtu isu hayaan. Badanaa caruurga kalgaceyl qoto dheer ayey leeyihin waalidkood iyo dadka kale ee muhiimka u ah kuna xeeran, waxay koraan iyagoo kalsooni iyo jaceyl qaba.

## MARKA ILMUHU OOYAAN

Oohintu waa hab ilmuu kuula hadlaan. Ilmuu wuxuu ooyaa marka:

- Uu gaajeysan yahay
- Uu keli noqdo doonayana inaad kor u qaado
- Uu doonayo in marada looga geliyo kaadida ama xaarka (dhaayber) laga bedelo

- ay dad badan ilmaha la hadlaan
- Iyo mararka qaarkood markii ilmuu aysan caadi dareemeyn (dheybarka qabto, calool xanuun, kulul yahay ama qabow yahay)

## TUSALEYNTA WAALIDKA



*“Mararka  
qaarkood  
waxaad  
moodaa wax  
keliya ee  
ilmuhu  
sameeyo inay  
tabay oohin.  
Waxaan ka  
baqayaa  
hadaan mar  
kasta oo ay  
ilmuhu  
ooyaan aan  
kor u qaado,  
inay ku  
tagaan.”*

**Ilmahaaga ma haleyn kartid.** Ilmuu badanaa wax ay ayuu ooyaa marka kor loo qaado isla markaana kor loo haayo. Wax badanse ilmaha kor uma hayn kartid. Ilmuu wuxuu baranayaa inuu ku aamini karo, isla markaana uu ku heli karo marka uu kuu baahan yahay. Ayaamo ka dib, waxaad baran doontaa wax ilmaagu doonayo marka uu ooyo.

Markii ilmuu iska ooyo oo hadana ooyo, isku day sidii aad u deganaan lahayd.

- Isku day inaad ilmahaaga “geliso” ama ku duuduubto buste aan adkeyn isla markaana aad kor u hayso adigoo isku soo dhoweynaya
- Dhowr daqiqo oo biririf ah qaado oo naso. Dhig ilmahaaga meel amaan ah, sida sariirta caruurta oo kor ka furan. Ka dibna aad meel kale oo guriga ka mid ah oo aadan oohinta ilmaha maqli karin, ilaa aad xoogaa soo degto/xanaaqu kaa ba’o
- Ku rid ilmaha gaariga caruurta ka dibna banaanka u bax soona lugee
- Ilmahaaga ku rid gaarigaaga ka dibna meelahaas soo warwareeg
- Isku day inaad “xambaarto” ilmahaaga ama aad ku qaado bahalka ilmaha lagu qaado. Socodkaa ama garaaca wadnahaagu waa ku dejin karaa

- Isku day inaad ilamaha gaarigiisa aad ku ruxdo adigoo u si jilicsan ugu heesaya
- Wac saaxiib

Badanaa, marka aad ogato wax dhibka keenaya iyo waxa xalka u ah, oohintu waa istaageysaa.

In kastoo ay ku hayso inaad ilamaha aad ruxdo ama aad dhirbaaxdo, waa arin aan marnaba la aqbali karin. Ruxitaanka ama dharbaaxidda dhibaato weyn ayey u keeni kartaa ilmahaaga, xataa dhimasho ayey keeni kartaa.



### **Waa maxay calool xanuunku maxaanse ka sameeyaa?**

Lama yaqaano waxa sababa calool xanuunka. Calool xanuunku badanaa wuxuu bilaabmaa marka ay ilmuu saddex asbuuc jiraan socona kara ilaa ay saddex bilood gaaraan. Ilmahoo dhami waa ka koraan calool xanuunka. Ilmaha qaba calool xanuunka kor ayey u ooyaan, maalin kasta isku waqtii ayey ooyaan. Markii ilmahaagu sidaan u ooyaan, isku day inaadan kululaan. Isku day wax ilmaha dejin kara. Bareeg ama biririf qaado, wac saaxiib, la xiriiri dhaqtarka ilamahaaga, ama wac lambarada telefoonka ee ku qoran buuggaan.

*“Waxaa jira  
marar  
ilmuhu aad u  
ooyo. Markii  
uu ilmuu  
aad waqti  
dheer u ooyo,  
waxaay iga  
dhigtaa qof  
xanaaqsan  
isla  
markaana  
isku  
buuqsan.”*

## ILMUHU MARNA HABEENKII OO DHAN MA SEEXDAAN?

*“Qof kasta  
wuxuu i  
weydiyaa in  
ilmuhu  
habeynkii oo  
dhan seexdo.  
Waxaan is-  
iraabdaa  
waxbaa  
qaldan markii  
aan dhaho  
maya.”*

*Ilmaha hadda dhasha:*

Inta badan ilamaha hadda dhasha habeynkii oo dhan ma hurdaan. Ilmuhu inuu wax uu cuno, in la hayo ama laga bedelo waxa uu ku jiro kaadi iwm ayuu rabaa. La qaado waqtii degan ilmaha hadda dhashay. Ilmahaagu ma doonayaan inay nolosha kugu adkeeyaan.

*3 Bilood Jira:*

Caloosha ilmahaagu waa kortay, marka ilmuhu uma baahna inay wax cunaan badanaa habeynkii. Arintu si kastaba ha ahaatee, badanaa caruurta saddexda bilood jira waxay weli u baahan yihiin in ugu yaraan hal mar wax la siiyo. Si aad u caawiso in ilmuhu habeynkii oo dhan seexdaan:

- Hubi in ilmuhu ay intii ku filan maalintii cunaan
- Isku day inaad unto fiican siiso intaadan habeynkii seixin
- Aad ha isku mashquulin inta la hurdo habeynkii. Unto sii ilmahaaga kana bedel marada loo xiro (dhaayber) haddii uu aad u qoyan yahay



**Haddii aan ilmaha mushaaryo/boorash  
siiyo habeynkii si fiican ma u seexanayaa?**

Maya. Ilmaha badankoodu ma qaadan karaan mushaaryo/boorash ilaa ay ugu yaraan afar ilaa lix bilood gaaraan. Haddii aad ilmaha mushaaryo siiso hadda, calooshiisu ma qaadan karto, waana dhaafeysaa. Inuu seexdana ka caawin meyso.



### Hurdo ku celinta ilmaha

Ilmaha dhabarka u seexi si aad u yareysan qatarta Dhimashada Ilmaha ee Deg degga ah (Sudden Infant Death Syndrome). Hubi inaad ilmaha ku seexisi joodari siman isla markaana le'eg sariirta ilmaha. Sariirta ilmaha ka bixi waxyaalaha caruurta lagu cayaarsiiyo. Isticmaal marada ilmaha la dhex geliyo intii aad isticmaali lahayd buste. Hadaad buste isticmaasho, ilmaha cagahiisa soo mari dhinaca lugta sariirta. Buste qafif ah huwi ilmaha adigoo ku simaya ilaa xabadkiisa, darafyada bustahana hoos geli joodariga. Ilmaha ka ku seexin joodariga biyuhu ku jiraan, kursi, kursi sariireed, barkin, ama waxyaalo kale oo jilicsan lagu seexdo.

### 6 Bilood Jir:

Ilmaha qaarbaa habeynkii oo dhan seexda markay jiraan 6 bilood. Badanaa, ilmuu waa ku kicinaya si aad u hayso. Ilmaha qaar waxay u baahan yihiin inay wax cunaan.

Hel wax ilmaha ka caawiya inuu iskiis hurdada dib ugu laabtaan.

Waxyaalahan soo socda mid ka mid ah ayaad isku dayi kartaa.

- Garab istaag sariirta ilmaha. Dareensii inaad la joogto. Inaad kor u qaado qasab ma aha
- Si tartiib ah u salaax
- La hadal ilmahaaga. Codkaaga ayaa u sheegaya in wax kasta caadi yihiin ayna tahay inuu seexdo

Ilmaha qaab uu ku seexdo u samee. Qadkaas wuxuu noqon karaa inaad u qubeyso, aad sheeko u akhrido, aad nalka ka gaabiso, aad sariirta ku ruxdo ama u heesto.

Haddii aad fikrado kale u baahan tahay wac dhaqtarka ilmahaaga ama lambarada ku qoran buuggaan.



#### **Ka cabsashada qariibka**

Marka ay 8 ilaa 9 bilood jiraan, ilmo badan ayaa raba inay ka ag-dhowaadaan dadka ay aadka u yaqaaniin keliya. Ogow ilmahaagu wuxuu doonyaa inuu la joogo dad uu isku aamini karo. Sii waqtii ilmahaagu ku barto dadka ku cusub. Ha ku qasbin in qof ku cusub uusan hayn, ama qof uusan badanaa arkin.

**Haddii aad su'aal ka qabto korriinka  
ilmahaaga xilligan, kala tasho dhakhtarka  
ilmahaaga ama eeg qeypta macluumaadka ee  
buuggan.**




# Ilmaha roon

(9 bilood ilaa 2½ sano)

## KORITAANKA IYO TARBIYEYNTA

Ilmaha waaweyn waxay noqdaan kuwo madaax banaan isla markaana barta adduunka ay ku nool yihiiin.

- Waxay isku dayaan inay wax ogadaan, ordaan, fuulaan, ama wax taabtaan. Waxaa laga yaabaa inay xanaaqaan marka aad wax ka celiso
- Ilmuu waa yaqaanaan waxa ay doonayaan, wayna kuu sheegaan. Aad aye uga xumaadaan marka aad fahmi weydo waxa ay kuu sheegayaan
- Ilmuu waxay marka firshaan wax dadku sameynayo, ka dibna way isku dayaan. Waxay sameeyaan waxa ay kugu arkaan, reerka intiisa kale sameeyaan, waxay ku daydaan waxyaalaha ay ku arkaan telefishanka ama filimaanta
- Ilmaha da'daani ahi wax waa gartaan, balse waxay kaaga baahan yihii inaad caawiso marka ay wax garan waayaan aad ka ilaalso waxyaalaha qatarta ah



**Sidee ayaan cunugga u edbin karaa?**

- Aad u jeclow cunuggaaga
- U sheeg ilmahaaga in aad ku qanacsan tahay marka uu muujiyo anshax wanaagsan

- Marna cunuggaaga ha dharbaixin ama ruxin
- Waxyaalaha qatarta ah dhig meel aan cunuggu gaarin
- Haddii ilmahaagu doonayo wax aan loo ogoleyn, ku qalqaali wax kale oo loo ogol yahay
- Isku day inaad jadwal joogto ah aad maalin walba leedahay
- Marka aad daalan tahay ama howshu kugu badato, bareeg ka qaado howlaha waalidka
- Isweydii in ilmahaagu si xun u dhaqmayo ama uu isku dayayo inuu wax barto
- U dhaqan sida aad dooneyso in ilmahaagu u dhaqmaan. Hadaad ku qeyliso, isla waa kugu qeylin
- Si toosan oo qayaxan ugu sheeg waxa aad ilmahaagu ka rabto inuu sameeyo
- Ogsoonow waxa ilmahaagu isku sameyn karo

## ILMAHA WAX KASTA QABSANAYA

---

Marka ilmahaagu 9 bilood gaaro, guriga ayey isaga dhex rafataa. Waxay kaaga baahan tahay inaad mar kasa la joogto. Waxaa laga yaabaa inaad ogaatay inay wax isku dayeyso. Waa shaqada ilmaha roon-roon ay doonayaan inay adduunkooda ku bartaan. Waa sidan sida ilmuhi wax ku bartaan.

*“Hadda  
ilmabaygu  
waa socdaa,  
wax kastana  
gacanta ayey  
la galaysaa.  
Sidee baan u  
baraa  
ineysan wax  
taaban?”*

Siyaalaha aad gurigaaga amaan uga dhigi karto ilmahaaga waxaa ka mid ah:

- Waxyaalaha jabi karo ama aan amaanka ahayn, ka dheeree meelaha ilmahaagu gaaro
- Dabool meelaha korontada godadkeeda ama fillooyinka la geliyo
- Ka xir ilmaha armaajoooyinka iyo qaanadaha
- Jid gooyo uga samee ilmaha jaran-jarada iyo albaabada aan amaanka ahayn

Marka aad ilmaha wax aan amaan ahayn aad ka qaado, ilmuu waa kaa xumaanayaa. Isku day inaad siiso boonbale amaan oo ay ku iloobaan kii hore.



#### **Maxaa ilmaha looga celinayaa?**

Waa inaad hubisaa in meel kasta oo cunuggaagu uu aado ay amaan tahay. Ilmuu waxay isku dayayaan inay wax kasta ogaadaan. Wuxuu qeyd shababka oo qaybi ahayn. Sidan ayaa cunuguu wax ku bartaa. Ka caawi inay wax kasta ogaadaan iyaga oo bed qaba adigoo ka dheereynaya waxyaalaha aan loogu talo galin inay gaaraan. Markii cunuguu sii koro, u sheeg inuusan taaban waxyaalaha qaarkood.



#### **Muxuu ilmahaygu telefishanka ka baranayaa?**

Badanaa caruurto waxa ay telefishanka ku arkaan ayey ku daydaan. Haddii ilmahaagu si xun u dhaqmo, dhibku wuxuu noqon karaa barnaamijyada uu telefishanka ka fiirsado.

Ogow barnaamijyada ilmahaagu fiirsado. Waxaa fican inaad xadido waqtiga ilmuu telefishanka fiirsado. U hel wax kale oo ilmuu qabto sida akhrin, sawirid, ama uu banaanka ku cayaaro.

## BARIDA CUNUGU INUUSAN WAX TAABAN

Intii aad gacanta ka dharbaaxi lahayd, gacantiisa ka qaad meesha uu taabanayo kuna dheh “Maya.” Caruurta waa fahmaan waxa aan amaanka ahayn marka aad dhowr jeer u sheegto. Ilmahaagu waa iska deynayaa makiinadda raashinka markii uu ogaado in “xaax” ay mecnahedu tahay “kuleyl.”

Inta uu ilmuu wax baranayo:

- Ka qaad agagaarka makiinadda raashinka
- U hel wax kale oo uu jecelyahay
- U hel meel amaan ah oo uu ku cayaaro inta aad jikada ku jirto. Sii wax kale sida baaquli caag ah, qaado alwaax ah ama boonbaleyaashiisa

“*Marka ilmabaygu isku dayo inuu taabto makiinadda raashinka oo kulul, gacanta ayaan ka dhirbaaxaa si aan u fabamsiyo inuusan taaban.*”

### TUSAALEYNTA WAALIDKA

#### “Ma sameeyaa!”

Hadaad cunug leedahay, wax badan ayaad maqashay su'aashan. Badanaa, “Ma anaa sameeyaa” wax dhibaato ah ma leh inaad daahsan tahay mooyee. Ku dhiiri-geli ilmahaaga marka ay doonayaan inay wax qabsadaan. Sii fursad ilmaha ay inay lebistaan, ay cadeysadaan, ay kursiga

gaariga iyagu fuulaan. Arintan waqtii ayey qaadaneyso, inta ay wax isku dayayaan, markay horey isaga degaan, horey ka bartaan taasina adiga waqtii ayey baajineysaa.

## TABABARKA XANAAQA

Ilmahaagu wuxuu baranayaa xanaaqa iyo isku wareeridda. Feer ayuu duubtaa, indhaha isku qab-qabtaa, isla markaana qayliyaa. Waxaa laga yaabaa nuu wax laado, dhulka isku dhufto, ama uu dhibaato geysto.



*“Waxaan  
leeyahay ilmo  
18-bilood jir;  
balse markii  
uu xanaaqaqo  
waa nafta  
ayuu iska  
gooyaa!”*

Isku day inaad ka hortagto xanaaqa noocaan ah. Ka fogow inaad ilmahaaga meel u qado marka uu baahan yahay ama daalan yahay. Haddii ay qasab kugu tahay inaad u qado, cunto fudud, buugaag, boonbalayaal uu jecel yahay, ama qalimaan iyo waraaq uu wax ku sawiro si uusan u caajisin ama u xanaaqin.

- Maxay oohintu ugu badan tahay da'daan?
- Ilmuu ma fahmi karaan sababta aysan wax u taaban karin, u cuni karin, aysan u aadi karin meeshii ay rabaan
  - Ilmuu badanaa kuuma sheegi karaan waxa ay rabaan. Taas ayaa ka xanaajisa
  - Marka ilmuu gaajeysan yihiin, daalan yihiin, kulul yihiin, si xun u jiifaan, ama in la qaado rabaan, badanaa way ooyaan

Iskaa ilmahaagu ha is waalee, mar haddii uusan dhibaato isku geysaneynin ama cid kale wax u geysaneynin. Fahamsii inaad ogtahay inuu xanaaqsan yahay.

- Marka aad guriga joogto waxaa fiican in aad isdejiso aad iska dhegatirto is-waalitaanka ilmaha
- Marka aad joogto meel caam ah, is-deji ilmahana iska fur. Meel aan buuq lahayn tag, ilaa ilmuu joojiyo is-waalitaanka
- Caruurta qaar ayaan xanaaq jebi kain. Tartiib u qabo, si degan ula hadal, una sheeg inay caadi tahay

Meel kasta oo aad joogto, hadaad ilmaha tartiib ugu jawaabto, is-waalku waa dhamaadaa.

Markii ilmuu isku waalo meel caam ah, waxaa laga yaabaa inaad imaha siiso waxa uu rabo si uu qaylada u joojiyo. Markii waalidku saas yeelaan, caruurta waxay baranayaan in haddii ay is-waalaan inay helayaan waxa ay rabaan. Ha u ogolaan in ilmahaagu qaylo wax ku helo. Haddii kale waxaa dhici doono qaylooyin badan aakhirka.

### TUSAALEYNTA WAALIDKA

#### **Isku day inaad mashquuliso.**

Sida ugu wanaagsan ee loo hago ilmaha rabitaankooda waa adigoo meel kale ku mashquuliya. Haddii ilmahaagu rabo wax aan loo ogoleyn, sii wax kale oo uu ku cayaari karo. Haddii ilmuu aadaan dhinaca jarjanjarada, kor u soo qaad, isla markaana gee qol kale oo amaan ah.

## WUXUU U QABAA IN ISAGU TALIYO



*“Cunugeygu  
wuxuu u qabaa  
inuu yahay  
boqor isagoo  
labo sano jira.  
Waxa aan u  
sheego ma  
yeelo. Ma ogola  
inuu saarnaado  
gaariga  
dukaamada  
looga adeegto,  
waa ila  
dagaalaa  
marka aan  
kursigiisa  
gaariga ku  
rido, mar  
kastana wuxuu  
yiraabdaa  
‘Maya’!”*

Marka ilmuu laba sano gaaraan, waxay bilaabaan inay iskood wax u sameeyaan. Fikradahaan ayaa kaa caawin kara in ilmuu khibradiisa cusub isticmaalo isla markaana kuu sahlo howl maalmeedkaaga.

- Sii fursad uu ku doorto waxa uu rabo markii aad awoodo. Weydii, “Ma waxaad rabtaa inaad gaariga adeegga aad fuusho maanta, mise waxaad rabtaa inaad lugeyso?”
- Ha bedelin xeerarkaaga. Ilmuu wuxuu baranayaa waxa laga sugayo. Tusaale ahaan, waa inuu ku fariistaa kursigiisa gaariga; ma aha wax uu dooran karo
- U ogowlow inuu ilmuu fuulo kursigiisa gaariga. Haddii uusan awoodin, weydii inuu caawimaad u baahan yahay
- U ogolow waqtii saa’id ah oo ilmuu wax isugu dayo, isagoo aan buuq kugu dhalineyn

### TUSAALEYNTA WAALIDKA

#### **Isqabqabsi ka fogow.**

Ha ka rajeyn cunuggu inuu amarka qaato. Jahawareer ayey adiga iyo ilmahaba ku rideysaa. Haddii aad mar kasta ilmaha “maya” ku tiraahdo, isku day inaad mararka qaarkood “haa” tiraahdo. Haddii aan ilmuu wax kaa maqleyn, isku day inaad ka fogaato meelaha aad isaga dhacdaan. Xasuusnow inaad ilmaha ku amaanto markii uu wax san sameeyo.

## QANIINYADA

Waa iska caado in ilmuuhu wax qaniinaan, wax laadaan, ayna qaniinaan ilmaha kale. Ilmuuhu waa xanaaqaan ama caroodaan. Ma yaqaanaan erayo ay ugu sheegaan ilmaha kale inay xanaaqsan yihiin. Mararka qaarkood, marka ilmaha ilkuhu u soo baxayaan, waa jecel yihiin inay wax qaniinaan. Fikradahan ayaa kaa caawinaya si aad uga hortagto qaniinyada.


- U toog hay waxyaalaha ilmaha ka xanaajiya
- Bedel waxa ilmahaagu sameynayo inteysan xanaaqin oo aysan wax qaniinin
- Ilmuuhu waa xanaaqaan marka ay baahan yihiin ama daalan yihiin. Haddii tani dhacdo, isku day inaad bedesho jadwalka ilmaha, ama ka fogee ilmaha kale xilliyadan
- Kala hadal fikradahan dadka kale ee xanaaneeya ilmahaaga

Haddii ilmahaagu wax qaniino, si cad ugu sheeg inuusan wax qaniinin. **Marnaba ilmaha ha qaniin, hadduu ku qaniino.** Hadaad qaniinto ma baranayo inuusan wax qaniinin. Qaniiyadu waa ka sii dareysaa.

Markii ilmuuhu wax qaniino, ka wad caruurta kale. Waa inaad u garowdaa ilmaha la qaniinay. Taasi waxay ilmaha wax qaniinay tusaysaa inuu qaldan yahay, waxayna caruurta kale fahamsi-ineysaa in qaniinyadu wax xanuujiiso.

*“Waxa aan  
sameeyo ma  
garanayo.  
Maalin  
dhoweyd  
cunugeygu  
mid kale  
ayuu  
qaniiney.”*

## TABABARKA MUSQUSHYA



Waad ku dhiira gelin kartaa tababarka musquusha, balse ha ku deg degin. Badanaa waalidku waxay rabaan inay ilmaha baraan isticmaalka musquusha, intaan ilmuuhu diyaar u noqon. Ilmahaagu waxaa laga yaabaa inuu diyaar u yahay tababarka musquusha marka:

- Uu kuu sheego in maradu ka qoyan tahay ama marada kaadidu halowdo
- Uu kuu sheego inuu u baahan yahay musquusha

*“Waxay ila tabay inaan ku dedaalo sidii aan ilmabayga ubari labaa isticmaalka musquusha.”*

Caruurto badanaa ma gartaan “inay u baahan yihiin” musquusha ilaa ay saddex sano gaaraan. Labo sano jir waa bilaabi karaa tababarka musquusha balse waxaa laga yaabaa inuusan si fiican u tababaran ilaa uu gaaro 3 1/2 sano ama ka weyn. Marna ha ku cinqaabin ama ku ceebeyn hadduu marada loo xiray uu qooyo, haleeyo ama surweelka iska haleeyo.

### TUSAALEYNTA WAALIDKA

#### Aan isku kaadineyn.

- Caruurta marka ay ilaa 2 sano jiraan waxay baran karaan isticmaalka musquusha
- Markii ay 3 1/2 sano gaaraan, dhamaantoodse ma aha, caruurto iskuma kaadiyaan marka ay soo jeedaan
- Markii ay 5 sano gaaraan, dhamaantoodse ma aha, iskuma kaadiyaan markii ay in yar seexdaan ama habeynkii oo dhan
- Waxii faahfaahin ku saabsan tababarka isticmaalka musquusha, kala xiriir dhaqtarka ilmahaaga ama arag eeg qeybta macluumaadka buuggan

## **WAX QEYBSIGA**

Wax wada qaybsigu ma aha wax laba sano jirku fahmo. Ilmahaagu ma garan doono wax wada qaybsiga ilaa uu saddex ama afar sano gaaro. Si kasta oo aad laba sano jir ugu deydo inuu wax qaybsi ogolaado, aad ayuu u diidayaa. Waxaadse yeeli kartaa.

- Amaan ilmahaaga marka uu wax qeybsi sameeyo
- Tus sida wax loo qebsado, adigoo wax aad haysato wax ka siinaya
- Marki caruurtu ay wada cayaarayaan, hubi in boonbalayaal caruurta ku filan ay yaalaan

Cunuggaagu wuxuu baranyaa in wax wada qeybsigu fiican yahay.

*“Waa ku  
daalay sidaan  
isugu dayayey  
in laba sano  
jirkeygu wax  
qeybsiga  
ogolaado.”*

## **HAL WAALID DOORANAYA**

Waa dhibaato marka ilmahaagu adigu keligaa aad kabaha u gelin karto, cunto siin karto, ama aad seexin karto. Caruur badan ayaa soo marta arintan doorna bida hal waalid. Isku day inaad arinta wax weyn ka dhigin. Haddii aad la joogin, ilmahaagu waa baran doonaa in dad kale caawiyaan.

Arintan waxba yeysan kuu dhimin. Mar uun, ayaa ilmahaagu waxa uu u baahan yahay uu ula tagi doonaa dadka kale.

*“Ilmahaygu  
wuxuu  
jecelyabay hal  
waalid.  
Aniga mooyee  
in cid kale  
caawiso uma  
ogola.”*

## **WAX WASAKHEYN**

Ilmuu waxay u baahan yihiin fiiro joogto ah. Ilmuu waxay rabaan inay wax taabtaan, afka geliyaan, arkaan, ayna ogaadaan wax kasta. Sidaan ayey ilmuu ku bartaan aduunka ku xeeran.

*“Maalin  
dhoweyd  
cunugeyga 2  
1/2 sano jirka  
ayaa shuku-  
laato dareere  
ah ku  
haleeyey  
roogga  
fadhiba oo  
dhan. Aad  
ayaan u  
xanaaqay  
wax aan  
sameeyana  
waa garan  
waayey!”*

- Ilmuu wax uma haleeyaan si ay kaaga xanaajiyaa. Waxay wax u haleeyaan iyadoo isku dayaya inay wax bartaan
- Isku day inaad caruurta ka dheereyso waxa ay wax ku haleyn karaan. Gee ilmaha meel amaan ah oo ay wax ku baran karaan
- Ha iska indha-tirin waxa ilmahaagu haleeyey. Tani waa fursad qaaliya oo Aad ilmaha ku bari karto inay nadiifiyaan wixii ay haleeyeen. Ilmuu ha ku caawiyaan marka aad nadiifineyso wixii ay haleeyeen

### **TUSAALEYNTA WAALIDKA**

**La socoshada meesha cunuggu joogo.**  
Mar kasta waa muhiim inaad ogaato meesha cunug-gaagu joogo iyo waxa uu sameynayo. Cunugga howshiisu waa inuu ogaado wax kasta. Taasi waxay noqon kartaa inuu wax haleeyo ama in wax ku dhacaan. Howshaadu waa inaad hubisaa inuu bed qabo. Fiiro joogto ah u lahow cunuggaaga, wixii aadan rabin inuusan taabana ka dheeree.

## AAN FARIISANEYN

Ha ka sugin laba sano jir inuu fadhiyo. Macquul ma aha inay fadhiyaan. Fadhiga uma diidaan, umana qayliyaan, meelahaana uma ordaan inay kaa xanaajiyaa. Laakiin, wax kasta inay ka sal gaaraan ayey rabaan, inay socdaan ayey rabaan, wayna jecelyihiin inay adiga iyo dadka kaleba la hadlaan.

Waxaa jira marar aad dooneyso in ilmuu fariistaan, ayna aamusaan. Wuxaa isku dayi kartaa.

- U keen boonbaleyaal yar yar, buug sawireed ay ku cayaaraan
- U keen wax ay cunaan balse aysan meel ku haleyn karin, sida buskudka, miro la cuno, ama malmalaado
- Mar kasta ka og-dhawow
- Tus wax xiiseeya si aad u bedesho hamigooda
- La cayaar cayaaraha ilmaha
- Mararka qaarkood, adiga iyo ilmahaagu waxaad tegi kartaan meel aadan dadka kale qash-qashaadeyn



*“Muxuu  
cunuggayga  
labada sano  
jira uu u  
fadhiyi  
waayey una  
aamusnaan  
waayey?”*

**Haddii aad su'aal ka qabto korriinka  
ilmahaaga xilligan, kala tasho dhakhtarka  
ilmahaaga ama eeg qeybta macluumaadka  
ee buuggan.**

# Ilmaha aan iskuulka gaarin

( $2\frac{1}{2}$  ilaa 5 sano)

## KORITAANKA IYO TARBIYEYNTA

Ilmaha aan iskuulka gaarini waxay u dhaqmaan sidii iyagoo koray. Isla markaana, waxay rabaan inay ahaadaan ilmahaaga hada dhashay.

- Ilmahan aan iskuulka gaarini waxay ku adkeystaan inay iyagu wax qabsadaan, xataa haddii aysan aqoon sida loo qabto
- Waxay isku dayaan inay tijaabiyaan sharciyada loo dejiyey, isla markaana ka murmaan sharciga aysan jeclayn
- Ilmahaan wax badan ayey is-tusaan. Waxay ka cabsan karaan mugdiga, xayawaanka , jini-jiniga, iwm
- Waxay rabaan inay atoore meesha ka yihiin dadka kalena amar siiyaan
- Si fiiro leh ayey kuu fiirsadaan. Wuxuu aad sameyso ayey ka horqaataan waxa aad u sheegto
- Waxay mar walbaan inay ku qanciyan

## SU' AASHA WAALIDKA

### Sidee ugu wanaagsan oo ilmahaan u tarbiyen karaa?

- Aad u jecloow cunuggaaga
- U sheeg cunuggaaga marka uu sida aad rabtay u dhaqmo
- Ka fogee waxyalaha qatarta ah cunuggaaga.
- Isku day inaad jadwal joogto ah leeday maalin kasta
- Is-weydii: Cunuggu ma si xun ayuu u dhaqmaya, mise wax ayuu isku dayaya inuu barto?
- U dhaqan sida aad dooneysyo in cunuggaagu u dhaqmo
- Si toosan oo qayaxan ugu sheeg waxa aad cunuggaaga rabto inuu sameeyo
- Ogsoonow waxa ilmahaagu sameyn karo
- Waqtii la qaado cunuggaaga, siiba marka uu cayaarayo taasoo u muuqato iyagu atoore yihiin
- Qabo mark ilmahaagu wax fiican sameynayo, una sheeg inuu fiican yahay
- U diyaari cunuggaaga marxalado ka xanaajin kara
- Markii ilmuu wax ku wareeraan, ka caawi inay waqtii xaddidan (time out) qaataan
- U sharax shariyada u degan iyo waxa ku dhacaya haddii ay jebiyaan shariyadaas
- Qawlkaaga ha bedelin oo ka dhabee waxa aad tiraahdo

## TUSAALEYNTA WAALIDKA

### Isu diyaari marxalado adag.

Haddii ay noqoto inaad cunug dhib badan aad u kaxeyso dhaqtarka, dukaanka adeegga, ama meelaha kale oo uu si xun u dhaqmi karo, waxaad isku dayi kartaa.

- Intaadan bixin, la hadal ilmahaaga una sheeg sida aad dooneysyo inuu u dhaqmo. Tusaale

ahaan, u sheeg inaad ka rajeynayso inuu  
gaariga adeegga ku jiro, wax uu dukaanka ku  
arkayna weydiisan

- Isku day inaadan ilmahaaga u kaxeyn meel aad  
ogtahay inuu ku daalayo ama gaajoonayo
- Sii qaado waxa uu cuno iyo boonbalayaal
- Haddii ilmuhi si xun ugu dhaqmo dukaamada  
ama dhaqtarka, xasuusi xeerarkii deganaa.  
Weydii sidii laga rabay inuu u dhaqmo
- U sheeg ilmaha inaad aad ugu hanweyn tahay  
marka uu si fiican u dhaqmo



*“Gurigeygu  
xilliga  
burdada waa  
mid dhib  
badan. Marka  
aan ilamah  
sariirta geeyo,  
aad ayaan u  
daalanabay  
wax kalena  
ma qaban  
karo.”*

## DAGAALKA XILLIGA HURDADA

---

Waxa ugu fiican ee aad adiga iyo ilmahaaga aad  
u sameyn karto waa inaad sameysaa xili hurdo oo  
joogto ah.

- Go'aanso marka ilmahaagu seexanayo.
- Hawshaada bilow 30 daqiqiyo ama saacad ka  
hor xiliga hurdada
- Hawshaas waxaa ku jira u qubeyska ilmaha,  
cunto fuded siin, u cadeyid, iyo xili sheeko.  
Xiligan kuma haboona legdan hayaaro
- Isku day inaad jadwalkaas raacdo habeyn  
kasta



### Ilmahaagu mugdiga ma ka baqaa?

Kala hadal ilmahaaga cabsida. Cabsi run ayey ula muuqataa ilmahaaga: Marna ka shacatireysan. Isticmaal nalka habeynkii, ama nalka cabaar ha shidnaado. Caruurta qaar ayaa qaba inay amaan ku yihiin buste ama boonbalayaalka xayawaanka marka ay hurdaan. Haddii aad ilmaha ka caawiso cabsida mugdiga, cabsiyaha kale inuu barto ayey ka caawin kartaa.

Hadaad isku dayeyso jadwalka xilliga hurdada marka ugu horeysay, rajee xoogaa tashuush ah.

- Marka aad seexo, ilmuu wuxuu ka soo bixi kartaa qolka. Ha ka yeelin diban sariirta si tartiib ah ugu celi. Waxaa laga yaabaa in lagaaga baahan yahay inaad sidan dhowr jeer sameyso
- Badanaa caruurtu waxay soo maraan marxalad ay mugdiga ka baqaan. Faham in cabsida ilmuu ay run tahay, kana caawi inay ka gudbaan cabsida
- Isticmaal nalka hurdada ama nalalka qoloka dhexdooda ah oo shidan ka tag
- Caruurta qaar ayaa u baahan waqtii badan oo ay ku ga'aan. U ogolow in ilmuu wax akhristaan ama la hadlaan boonbalayaalkooda
- Ilmuu inuu debecsanaan dareemaa si uu u gam'o. Caruurtu waa ku kala duwan yahay arintan. Isku day inaad hesho wax ilmaha debcin kara. Ilmuu tartiib ha u neefsado, hees degan ha qaado, ama haysto boonbale xayawaan
- Badanaa hadaad ka goyso, jiifka galabtii ilmaha hurdo ayaa qabaneysa xilligii hurdada

## HAL WAX KELIYA CUNAYA



*“Si kasta oo  
aan isugu  
dayo,  
ilmahayga  
afar-sano jirka  
abi ma cuno  
raashin kasta  
oo aan u  
keeno. Ma  
doonaya inaan  
laba cunto aan  
kariyo.”*

Marka aad leedahay ilmo raashinka kala doorta, xiliga cuntadu ma sahlana. Xilliga cuntada waqtii fiican ka dhig.

- Raashin kala duwan oo fiican ku day ilmahaaga
- Haddii ilmahaagu uusan jecleyn inuu raashin cusub isku dayo, in yar saxankiisa saar. Weydii inuu isku dayo hal ama laba jeer
- Ha ku qasbin ilmaha inay saxankooda banneeyaan
- Caruurta qaarkood ma jecla raashimo la isku daray. Waxaa laga yaabaa in ilmahaagu bariis iyo galey gooni loo kala guray uu cuni lahaan, laakiin uusan cuneyn haddii la isku daro
- Caruurta qaarkood waxaa laga yaabaa inay dhahaan waan dheregsanahay markaad raashin siiso, balse balse ay rabaan inay cunaan macmacaanka. Isku day xeer oranaya waa inay marka hore raashinka cunaan, intaysan macmacaan cunin
- Ogsoonow, dhadhanku waa isbedelaa. Waxaa laga yaabaa in ilmuu cuno wax uusan horey u cuni jirin

### TUSAALEYNTA WAALIDKA

#### Jikada kaa caawinaya

Ilmahaagu wuxuu marayaa da' uu kaa caawin karo jikada. U ogolow ilmahaaga inuu kaa caawiyo doorashada raashinka la karinayo. Ha kala doorato raashinada wanaagsan ee kala duwan. Ilmuu wax

badan ayuu baranayaa, isla markaana aaminaysaa  
in waxa ay dooratay ay muhiim yihii.

## SU' AASHA WAALIDKA

### Macmacaan sidee ah ayaa wanaagsan?

Soodada guriga lagu sameeyo oo lagu qasay cabitaanka la qaso iyo biyo aashito leh. Meeshii aad nacnac ka siin lahayd, sii karooto, moos, tufaax iyo canab. Meeshii aad bataatiga baceysan aad ka siin lahayd, see buskud. Wax uu ku farxo, koob ugu qabooji cabitaan qasan (jilaato).

Waxaa kaloo aad sameyn kartaa:

- Xaqiiqso inta aad ama ilmuu saxanka ku rito. Caruurtu uma baahna in le'eg raashinka dad waaweyn
- Dhadhanka ilmuu waa ka duwan yahay dhadhankaaga. Caruurtu ma jecla raashinka dhadhanka adag, sida basasha, ama raashinka uusan midabkiisa ama wax uu ka sameysan yahay uusan aqoon
- Waa iska caadi in caruurtu maalin gaajeysan yihii, maalinta xigtana in yar cunaan
- Caruurtu waa ka calool yar yihii dadka waaweyn. Waxay cunaan raashin yar markiiba, laakiin waxay u baahan yihii inay dhowr jeer wax cunaan maalintii
- Ilmahaaga ka caawi inuu maalintii oo dhan cuno raashin caafimaad leh
- Kala hadal dhaqtar in ilmuu raashin ku filan cuno

## TUSAALEYNTA WAALIDKA



### Wax haleynta xilliga cuntada.

Waad ka hortagi kartaa wax wassakheynta xilliga cuntada. Dabool koobabka, weelka raashinka ilmaha, iyo baaquliga ama saxuunta. Kursiga raashinka ilmaha ayaa ku fiican qaabka fariisinta ilmaha.

## AWOOD SHEEGASHO



Waalidku si xanaaq leh ayey ugu jawaabaan ilmaha marka ilmuu wax sameyn waayo. Marka aad xanaaqdo, ilmuhuna waa xanaaqayaa. Marka aad ilmaha ka rabto inuu wax sameeyo, wax kale la dooransii. Xilliga hurdada, meeshii aad ka weydiin lahayd “Qubeys diyaar ma u tahay?” dheh, “Waa xilligii hurdada. Ma waxaad rabtaa saabbuun mise biyo cad?”

*“Waxaan  
dhabaa  
'Maya,'  
ilmabayguna  
wuxuu  
dhabaa  
'Haa.'  
Maxaan wax  
kasta isugu  
dagaalnaa?”*

Erayo isticmaal marka aad ilmahaaga la hadleyso. Si qayaxan toosna ah ugu sheeg waxa aad ka rabto in ilmuu sameeyo. Meeshaad ka oran lahayd, “Waxaan nadiifi,” dheh “Waxaan kaa rabaa inaad boonbalayaashaada aad aruuriso kuna rido baakadkoodii.”

Marar qaarkood waxaa fiican adigoo tusa intaad la hadli lahayd. Ilmaha waxaad dhowr jeer u sheegtay inay fariisato waxna cunto, balse jikada ayey iska wareegeysaa. Hadalka jooji si degana saxankeeda uga qaad miiska. Haddii ay tiraahdo inaan cunaan rabaa, u sheeg inaad raashinka u soo celi doonto marka ay kursigeeda ku fariisato diyaarna u tahay inay wax cunto. Badanaa, kursigeeda ayey ku soo noqoneysaa.

Iska ilow waxyaalaha qaarkood ilmuu sameeyo.  
Ha u jawaabin wax kasta oo ilmuu sameeyo.  
Mararka qaarkood ilmuu wax kaa xanaajiya  
ayuu sameeyaa si uu kuu soo jeediyo. Haddii aad  
iska dhegatirto, waxay u badan tahay inuu  
joojiyo. Tamartaada u keydso arimaha waaweyn.

### TUSAALEYNTA WAALIDKA

#### Fahamka dareenka ilmahaaga

Markii ilmahaagu isku dhexyaaco, xanaaqo, ama murugoodo, u sheeg inaad fahamsan tahay. Dheh "Waa arkaa inaad xanaqsan tahay." Mararka qaarkood intaas keliya ayuu ku qancayaan kuna caro baaba'ya. Garashada dareeniisa macnheedu ma aha inaad "is-dhiibtay" ama ogolaatay dhaqankiisa.

### SU' AASHA WAALIDKA

#### Maxay tahay waqtii xaddidan (time out)?

Waqtii xaddidan waxaa loola jeedaa marka aad ilmaha ka wadayso arin faraha ka sii baxaysa oo uu ilmuu anshax-xumo sameynayo. Waqtigii dhamaa fursad ayey siineysaa ilmaha iyo waalidka inay qabobaan. Eeg qeybla "Waqtigii Xaddidan" iyo sida loo isticmaalo dhamaadka buugaan.

## ISKU KAADINAYA



Caruurta badankeedu waa joojiyaan inay isku kaadiyaan habeynkii marka ay bilaabaan xanaanada ama in yar ka dib. Wiilasho in gabdhaha ka badan ayey ku qaadataa. Haddii ilmuu ka xun yahay isku kaadiyida, u sheeg in marka ay weynaadaan ay joojin doonaan isku kaadiyida. Wax weyn ka ha dhigin.

*“Waxaan u maleynayey in shan-sano jirkeygu joojiyey isku kaadiyid xilligan.”*

Waxaadse sameyn kartaa:

- Ka fogow biyo ama cabitaan siin jiifka ka hor
- Isticmaal kastuumoooyinka la tuuro
- Isticmaal joodari aan kaadidu gudbi karin
- Ilmuu ha soo kaadiyo marka uu seexanayo

Kaadi u kicinta ilmaha habeynkii waxay u keeni kartaa isku-buuq mana wanaagsana. Haddii aad uga welweleyso, la hadal dhaqtarka ilmaha.

## CABANAYA

Caruurta qaarkood waa cabtaan marka ay wax rabaan, qaarna waa cabtaan marka ay daalan yihii. Cabashadu waa si ilmuu kuu soo jeediyo. Wuxuu rabaa wax aan loo ogoleyn, gaadada saar una sheeg inay fiinaan lahayd inuu helo, balse aan loo ogoleyn. Waxaa laga yaabaa inaad dhowr jeer aad ku celceliso

- Marka ilmahaagu bilaabo cabasho waayo wuxuu rabaa wax aan loo ogoleyn, gaadada saar una sheeg inay fiinaan lahayd inuu helo, balse aan loo ogoleyn. Waxaa laga yaabaa inaad dhowr jeer aad ku celceliso

- Haddii uu sii cataabo, ha xanaaqin meeshana ka tag
- Waa muhiim inaan cataaw, is-caburin, xanaaq, wax jajabin, ama anshax xumo waxba aan ilmuuhu wax kaaga qaadin. Haddii ilmuuhu sidaad waxa uu rabo uu ku helo, sidaad ayey u dhaqmaysaa, si xun ayeyna u dhaqmi doontaa

*“Maxaan ka  
sameyn  
karaa shan-  
sano  
jirkayga?  
Waa iska  
cabanayaa.”*

### TUSAALEYNTA WAALIDKA

#### **Marka ilmuuhu wanaagsan yahay.**

U sheeg marka uu si wacan u dhaqmo. Amaan markii uu wax fiican sameeyo si ilmuuhu u fahmo waxa aad ka sugeyso ama ka rajeynayo.

**Haddii aad su'aal ka qabto korriinka  
ilmahaaga xilligan, kala tasho dhakhtarka  
ilmahaaga ama eeg qeybta macluumaadka ee  
buuggan.**

# Iskuulka hoose

(5 ilaa 9 sano)

## KORINTA IYO TARBIYEYNTA

Ilmaha iskuulka hoose waxay qabaan in adduunku iyaga ku kooban yahay.

- Inay helaan fiiro gaar muhiim ayey u tahay ilmaha da'daan
- Saaxiibtinimadu aad ayey muhiim ugu tahay ilmaha dugsiga hoose. Waxay u baahan yihiin inay ilmaha kale la hadlaan, midba midka kale dareenkiisa fahmo, fahmaana macnaha saaxiibtinimada
- Waalidkuna muhiim ayuu u yahay. Ilmuu inaad sharci u sameyso isla markaana ay raacaan ayey ilmuu kaaga baahan yihiin. Waxay kaaga baahan yihiin inaad ka caawiso si ay wax cusub isugu dayaan, aad dhegaysato aadna tusto si wax loo xaliyo



**Maxaa tahay siyaabaha ugu wanaagsan ee lagu tarbiyeeyaa ilama iskuulka hoose?**

- Jeclow ilmahaaga, wax kasta oo uu sameeyo
- Sameyso jadwal joogto ah
- Tus waxa san
- Si cad ugu sheeg ilmaha waxa aad ka sugeyso inuu sameeyo
- Tus ilmaha inaad xiisneyayso waxa uu sameynayo
- Isku day inaad fahamto waxa ilmuu kuu sheegayo
- U sheekee si aad u fahamsiiso waxa aad rabto

- Diyaar u ahow inaad sharciyada bedesho ilmaha oo sii koraya awgeed. Isbedel ku samee haddii loo baahdo
- Ka qaad wax loo ogolaa hadduu akhlaaq xumo muujiyo. Markii ilmuhu waxa saxda ah sameeyo, sii wixii aad ka qaaday
- Ka rajee ilmuhu inuu sameeyo ama bixiyo wixii uu jebiyo
- Ha is-bedbedalin. Samee wixii aad tiraahdo.
- Marka ilmuhu wax ku wareero, u sheeg inuu "waqtii xaddidan" qaato
- U sheeg ilmaha marka aadan ku qanacsanay akhlaaqdiisa. U sheeg, sidoo kale, markii uu u dhaqmo sida aad rabto

## TUSAALEYNTA WAALIDKA

**Ku caawi ilmahaaga inay hagaajiyaan BTJ-dooda (xarfaha bilowga alfabeetada) si ay u gaaran Y-da (xarafka ugu danbeeya alfabeetada)**

Ma ogtahay in badanaa ilmaha iskuulka hoose ay u baahan yihiin 10 saac oo hurdo ah habeyn kasta? Caruurta aad u nasta waa faham fiican yihiin waxna baran ogyihii.

## **MARKA ILMUHU SHARCIGA JEBIYAAN**

---

*“Ma fabmin.  
Ilmahaygu  
sharciga waa  
raaci jiray,  
balse hada  
wuxuu u  
muuqdaa  
inuu doonayo  
inuu mid  
kasta jebiyo.”*

Caruurtu waxay soo maraan marxalado ay tijaabiyaan sharciyada. Ilmahaagu wuxuu isleeyahay sharciyadii hore waxay noqdeen wax ciyaalnimo.

- Dib u eeg sharciyada iyo baahidooda. Eeg in sharciga weli shaqeyn karo iyo in ilmuhu ka weynaaday sharcigaas
- Kala hadal ilmahaaga sababta sharciyada ay jiraan
- Hadaad go'aansato inaad bedesho sharciga, kala hadal ilmahaaga sida sharcigu isu bedelayo iyo waxa dhacaya hadii la jebiyo
- Markii ilmuhu sharci jebiyo, ha iska dhega tirin. Jawaabtaadu ha barto muhiimada sharciga iyo sida uu si wanaagsan ugu dhaqmi karo aayaha dambe

### **TUSAALEYNTA WAALIDKA**

#### **Maxaan sameyn karaa marka ilmuhu sharciga jebiyo?**

Sharciyadu waa na badbaadiyaan, na tusaan sida loo dhaqmo, isla markaana naga caawiyyaa inaan dadka kale la dhaqano. Marka ilmuhu sharci jebiyo, waa inaad ugu jawaabtaa qaab uu u fahmi karo sababta ay muhiim u tahay in sharciga la raaco. Waxay noqon kartaa cinqaab. Tusaale ahaan, waxaad sameysay sharci oranaya telefis-hanka lama fiirsan karo ilaa laga shaqeeyo leyliyadii iskuulka. Ilmahaagu wuxuu fiirsaday fiidiyoow intususan leyligii ka shaqeyn. Cinqaabta uu

helayo waa isagoo aan fiirsan karin telefishan hal maalin. Markii aad sidaa u sheegto, hubi inaad sii raacdo.

## BEEN SHEEGID

Caruurtu been ayey sheegaan sababtoo ah waxay ka baqayaan in la cinqaabo, ama la qabtay, ama is yiraahda waxaa sahlan adigoo been sheegga. Caruurtu waxay kaloo maraan marxaldo ayaa badanaa been sheegaan.

- U sheeg ilmaha inaad ogtahay inay been sheegayaan
- Marka aad ilmaha kala hadalyso beenta, ka fogow wax ku keeni kara inay been kuu sheegto si ay u daboosho beentii hore
- Hubi in dadka waaweyn ee ku nool guriga aysan been sheegin. Caruurtu badanaa waxa aad sameyso ayey ka hor qaataan waxa aad u sheegto
- Haddii aad ilmaha si cad ugu sheegto in beentu xun tahay, ilmahaagu wuxuu baranayaa in beenta aan la aqbali karin
- Amaan ilmahaaga markii uu runta kuu sheego baxar kasta ha ku jiree

*“Maalin  
dhoweyd  
gabadhaydu  
been ayey ka  
sheegtay lacag  
ay qaadatay.  
Markii aan  
weydiiyey,  
waxay tiri  
shil ayey  
ahayd.”*

## DAGAALKA CARUURTA



*“Inaan  
timaba iska  
rifo ayaan  
joogaa!  
Maxaysan  
ilmahaygu  
u heshiin  
karin?”*

Caruurta da’dan ahi waxaa ku adag inay walaalahood nabad ku wada joogaan. Wuxaad rabtaa in ilmahaagu isku fiican yihii. Wuxaad rabtaa inay isku farxaan isna tixgeliyaan. Gurigaagu inuu nabad ahaado ayaad rabtaa.

- Dagaalku badanaa wuxuu ka bilaabmaa isku qabsasho shey ama boos. Si cad u qeex waxa la wada leeyahay iyo wax gaarka loo leeyahay. Qofka gaarka wax u leh ayey u taal hadduu dadka kale la qaybsanayo iyo in kale
- Isku day inaadan is garab dhiggin caruurtaada. Ilmo kasta sidii qof gaar ah ula dhaqan
- Mid kasta mar firo gaar ah u lahow
- Weydii ilmahaaga siga ugu wanaagsan ee ay isu tixgalin karaan. Arintu si kastaba ha ahaatee, adigaa go’ansanayo fikradaha macnaha sameynaya

Qof kasta oo guriga jooga wuxuu u baahan yahay tixgalin iyo inuu amaan qabo.



### Hagidda qilaafka ilmahaaga dhexdooda

Dagaalka walaaluhu waa qaab ilmuu ku bartaan sida loo xaliyo isqabqabsiga. Haddii ay macquul tahay u daa ilmaha inay xaliyaan qilaafkooda. Soo fara gali marka ay qilaafkooda xalin kari waayaan ama aad is leedahay talo fara ayey ka sii baxaysaa.

## ERAYADA XUN XUN

Waxay u badan yahay in ilmahaagu erayo xun xun ka soo barto iskuulka. Mararka qaarkood ilmuu waxay bilaabaan isticmaalka erayada xun xun si loogu arko nin balaayo ah.

- U sheeg ilmahaaga in isticmaalka erayada xun xun aan laga ogoleyn guriga. Si cad ugu sheeg ilmahaaga in looga baahan yahay inuu raaco sharcigan xataa marka uu iskuulka jooga
- Ka firso erayad aad adigu isticmaasho. Hadaad eray xun isticmaasho ilmuu waa kaa baranaya
- Waligaa afka ilmaha ha ku dhaqin saabuun ama wax si xun u dhadhama (erayga xun ee uu yiri awgeed)

### TUSAALEYNTA WAALIDKA

#### Eray fiican isticmaal.

Qasab waxaa jiray marar aad suulka dhagax ku dhufsatay ama suulka dube isaga dhufatay. Wixii ugu horeeyey ee aad tiri ayaa laga yaabaa inuu ahaa erayga afarta-xaraf. Caruurlaba waa ku dhacday. Bar ilmahaaga eray fiican oo uu isticmaalo.

*“Waa ogahay  
ilmahaygu  
erayo xun xun  
ayuu iskuulka  
ka soo bartay.  
Ma doonayo  
inuu  
erayadaad  
guriga ku  
isticmaalo.”*

## KULA MURMAYA

*“Gabadhaydu  
waa dhaaftay  
ixtiraam’ Ma  
akhbalayo ilmo  
igu af-celiya  
mar kasta.”*

Waa sahan tahay si aad u xanaaqdo, marka ilmuu uusan ku tusin tixgelin. Sida aad ugu jawaabta ilmaha ayaa bari karta ilmaha macnaha ay leedahay tixgelintu.

- U sheeg ilmaha inuu ku dhegaysto, laakiin adiga iyo ilmuu ha sii wadina hadalka ilaa aad ka xanaaq baa'badaan
- Raali gali hadaad xanaaqday oo aad ku qaylisay ilmaha. Macnaha waxaad ilmaha tusaysaa tixgelinta akhlaaqda wanaagsan
- Markii aad labadiinuba qabowdaan, si sheeg ilmaha erayada ama sida uu kuula hadlay ee muujinaya tixgelin la'aan. U sheeg ilmaha sida aad hadalka u aragtay. U sheeg ilmaha waxa aad ka sugeyso aayaha dambe

### TUSALEYNTA WAALIDKA

**Waa caadi inaad ilmaha raali geliso.**  
U sheeg ilmaha, "Run ahaantii hadaayey aad ayaan u xanaaqay. Waan ka xumahay inaan si xun kuula hadlay. Tixgelin la'aan igama ahayn." Labadeenuba ma saxneyn. Tani waxay ilmaha bareysaa inay adiga iyo dadka kaleba raali geliyaan noloshooda.

**Haddii aad su'aal ka qabto korriinka ilmahaaga xilligan, kala tasho dhakhtarka ilmahaaga ama eeg qeybta macluumaadka ee buuggan.**



# Dharbaaxada

Waalidku badanaa ma dharbaaxaan caruurtooda. Hadana dad badan ayaa mararka qaarkood dharbaaxa ilmahooda. Waayo? Sababta waalidku u dharbaaxo waxaa ka mid ah:

## **“Dharbaaxadu waa ii shaqeyso.”**

Dharbaaxidu waxay soo jeedineysaa dareenka ilmahaaga, waxayna joojineysaa wixii ilmuu sameynayey–markaas ayada ah. Dharbaaxadu ilmaha ma barto waxa aad ka rajeynayso, ama sida loo dhaqmo aayaha dambe. Ilmaha ma barto inay si fiican u dhaqmaan marka aan waalidku joogin oo aysan ogeyn in sharciga la raacay.

## **“Haddii aanan ilmaha la dharbaixin, akhlaaqda ayaa ka lumeyso.”**

Dharbaaxadu ilmaha kama celiso inaysan halaabin. Caruurga halaabay waxay barteen inay wixii ay rabaan ay ku heli karaan oohin iyo kiis iska waalid. Waalidka caruurtooda haleeya waxay ilmaha u qabtaan wixii ay rabaan, meeshii ay caruurga ka bari lahaayeen sidii ay wax u qabsan lahaayeen. Sida ugu wanaagsan ee ilmaha looga ilaaliyo inaysan halaabin waa adigoo jeclaada si wanaangsana u daryeela, sharci cadna u sameeya dhaqankooda.



**Khasnadda dareenkaaga.**

Uga feker waalidnimada sida khasnadda bangigaaga oo aad ilmahaagu ku haysato. Wax kasta oo wanaagsan-salaanta, amaanida, khibrad barida, iyo meel marinta sharchiyadu waa-keyd lagu xareeyey akoonkaas. Wixii xun ee aad sameyso-ku qaylin, dharbaaxis, ceebeyn-waa wax aad kala baxday akoonka. Waa inaad keydiisa in ka badan inta aad la baxeysa si aad xiriir wacan ula lahaato ilmahaaga.

**“Dharbaaxada waa iska ilaaliyaa,  
balse waxaad moodaa wax kale ma  
shaqeeyaan.”**

Waalid badan ayaa qaba in dharbaaxadu wanaagsan tahay, mararka qaarkoodna loo baahan yahay. Waalidku hal wax keliya ayey ka fekeraan marka ilmuhi si xun u dhaqmo: dharbaaxo. Waalidku waxay ilmaha dharbaaxaan markii ay xanaaqsan yihiin ama wareeraan. War fiican waxaa ah in ay jiraan siyaabo kale oo loogu jawaabi karo marka ilmuhi si xun u dhaqmaan. Waalidka waxyaabaha kale u isticmaala inay edbiyaan ilmaha, badanaa waxay ogadaan in waxyaabaha kale ka fiican yihiin dharbaaxada.

**“Dharbaaxadu waa qayb ka  
mid ah dhaqankeyga.”**

Dharbaaxada aad ayaa looga isticmaalaa dhaqamo badan. Waa wax bulshooyin badani sameeyaan, dhaqan ay gooni u tahayna ma jiro.

**“Waa la i dharbaaxi jiray si fiican  
ayaana u soo koray.”**

Badanaa dadka la dharbaaxi jiray waxay u koraan si caadi ah. Arintu si kasta ha ahaatee, taasi uma dhicin dharbaaxada awgeed. Macnaheeduse waa in waalidkood ay isticmaaleen qaabab kale oo wanaagsan oo ay ku tarbiyeynayeen. Wuxaan daraasaad la sameeyey ka ogaanay in dharbaaxadu ilmaha u horseedi karto dhibaatooyin ay ku jiraan isla-hadal, xaas dhibaateyn, iyo isticmaalka kimikada.



## Xanaaqa

### **MAXAA LA SAMEEYAA MARKA ILMAHAAGU KAA XANAAJIYO**

Waalid kasta wuxuu ogyahay siduu u xanaaqa marka ilmhu uusan si fiican u dhaqmin. Wuxaa maskaxda ku haysaa:

- Xasuusnow, waxaa kaa xanaajinaya waxa ilmuu sameynayo, ee ilmahaaga ma aha
- Dharbaaxada iyo cinqaabaha kaleba ilmaha ma barayaan wax kale ee uu sameyn karo
- Hubi in ilmahaagu sameyn karo waxa aad ka rajeynayso inuu sameeyo



**Run ahaantii kuligeen maalmo dhib badan  
ayaa na soo mara.**

Mararka qaarkood waxaa na dhiba qaabka ilmuu u dhaqmayo sababtoo ah run ahaantii qof ama wax kale ayaan ayaan u xanaaqsanahay. Haddii taas mar kasta dhacdo, way fiican tahay inaad caawimaad ama taageero aad ka hesho cid gurigaaga ka baxsan.

## Afar tilaaboo oo lagu koontarooli xanaaqaaga

### 1. Jooji!

Naso oo xanaaq baaba'. Sug ilaa aad caro ba'do intaadan tarbiyeyn ilmahaaga.

### 2. U kuur gal dhageysana

Dhibku muxuu yahay? Maxaa sababay in ilmuu si xun u dhaqmo? Run ahaantii ma ogtahay in ilmuu si xun u dhaqmayo? Ma caadi sida ilmuu u dhaqmayo marka loo eego da'diisa?

### 3. Ka feker

Maxaad u maleynaysaa inay dhacaan? Tix-geli waxyaalaha aad sameyn karto. Maxaad rabtaa in ilmahaagu barto?

### 4. Ku dhaqaaq

Fuli go'aankaaga.

TUSAALEYNTA WAALIDKA

#### Fikrado aad ku caro baabi'in kara.

- Tiri kow ilaa toban si tartiib ah. Ka feker tirada, ama wax kale oo kaa farxiya, intii aad ka fekeru lahayd ilmahaaga
- Gali gacmaha jeebkaaga. Taasi waxay kaa caawineysaa inaadan ilmaha u dhaaran ama dharbaixin
- Si wanaagsan u neefso, si tartiib ahna u sii daa. Iska dhig inaad qiiq ka sii deynayso jirkaaga
- Ka tag meesha wax ka dhaceen. Qol kale aad ama banaanka soo soc-soco (Tan yeel oo keliya haddii ilmahaaga guriga looga tagi karo keligiis ama haddii qof kale la joogo.)
- Dhibaatada kala hadal xaaskaaga/ninkaaga, saaxiib, ama qof aad xigaalo tiihin

## Waqtii xaddidan (time out)

### ARIMO LA XIRIIRA WAQTI XADDIDAN (time out)

Dhamaad waxaa loola jeedaa marka aad ilmaha ka wadayso arin faraha ka sii baxaysa oo uu ilmuu anshax-xumo sameynayo. Waqtii xaddidan fursad ayey siineysaa ilmaha iyo waalidka inay qaboobaan.

- Isku day inaadan waqtii xaddidan mar kasta isticmaalin
- Waqtii xaddidan waa inaan loo isticmaalin ilmaha 3 sano ka yar
- Waalidku waa inay degan yihiin, balse ku adkeystaan, markii ay ilmaha dhahaan waqtii xaddidan



#### Maxay tahay waqtii xaddidan?

Waqli xaddidan waxaa loola jeedaa marka aad ilmaha ka wadayso arin faraha ka sii baxaysa oo uu ilmuu anshax-xumo sameynayo. Waqtii xaddidan fursad ayuu siinaya ilmaha iyo waalidka inay qaboobaan.

Sida loo isticmaalo waqtii xaddidan:

- U hel meel fiican oo ilmuu tagaan markii ay wax haleeyaan. Waa inay ka fogaataa meeshii wax ka dhaceen ama meeshii akhlaaq xumada ku sameeyey
- U sheeg ilmahaaga inuu bareeg u baahan yahay. U sheeg inaad uga baahan tahay inuu

joogo meesha loo gartay ilaa uu ka dego ama diyaar u yahay inuu si wanaagsan u dhaqmo

- Haddii ilmuu isku dayo inuu meeshii ka tago intaan xilgii dhamaan, si tartiib ah ugu soo celi. U sheeg inuu goobtisii cayaarta ku soo noqon karo markii uu dego ama ama diyaar u yahay inuu si wanaagsan u dhaqmo
- Markii ilmuu dego, kala hadal sababti uu ugu baahnaa in meesha laga wado iyo waxa aad ka rajeynayso hadda ka dib. Haddii ilmuu ilmo kale waxyeelay, waa inuu raali galin ka bixiyaa. Haddii uu wax tuuray, waa inuu soo qabtaa. Tani waxay ilmahaaga fursad u siineysaa inuu saxo anshax xumadiisa
- Mar kasta amaan ilmahaaga markii uu caro baaba'o kuna soo laabto howshiisii dhibaato la'aan

Fikrado kale:

- Waalidka qaarkood waxay isticmaalaan saacad. Sii hal daqiiqo oo waqt xaddidan ah inta sano ee ilmahaagu jiro. Tusaale ahaan, haddii ilmahaagu 4 sano jiro, 4 daqiiqo ayuu joogayaa meesha ganaaxa
- Markii ilmuu sii koraan, isku day inay meesha ganaaxa ka tagaan markii ay diyaar yihiin. Taasi waxay ilmaha ka caawineysaa inay ogadaan markii ay caro baaba'een
- Waa iska caadi in ilmuu buug akhristo ama xujooyin isku gee-geeyo marka uu ku jiro meesha ganaaxa. Sii boonbalayaal ama buugaag uu ku caro baaba'o
- Ku dhiiri geli ilmaha inuu iskiis u qaato waqt xaddidan markii uu u baahan yahay inuu dego ama uu u baahan yahay bareeg

## TUSAALEYNTA WAALIDKA

### Isticmaalka waqtii xaddidan.

Waqlii xaddidan waxaa loo isticmaalaa in laga hortago anshax la'aan. U sheeg ilmahaaga inuu waqtii xaddidan inta uu ka caro baaba'yo loogana hortago arinta oo faraha ka baxda. Waqti xaddidan waxaa kaloo loo isticmaali karaa marka ilmuu muujiyo anshax la'aan. Fursad lagu dego ayey cid walba siineysaa. Markii waqtigii dhamaado, waxaad xalin kartaa dhibka jira.



# Maclumaadka

## **QAYBTA MACLUUMAADKA**

1. Xasuusnoow, rugta caafimaadka ilmahaagaayaad ka heli kartaa akhbaarta la xiriirta waalidnoqoshada caafimaadka leh. Kala hadal caafimaadka ilmahaaga iyo koritaankiisa. Anshaxa ilmahaagu waxay ku tusi kartaa calaamado dhib muujin kara una baahan in dhaqtarka loo sheego.
2. Wac qadka diirinta waalidka **(612) 813-6336** wixii su'aal ah ee ka qabta asluubta ama korintaankiisa. Diirinta Waalidku waa adeeg telefoon lagulana tashto Children's Hospitals and Clinics. Waqtigan, adeeggan luuqadda Ingiriiska keliya ayaa lagu heli karaa. Luuqadaha Spanish, Hmong, iyo Soomaali, qoysaska waxaa lagu dhiiri gelyaa inay wacaan khadka **2-1-1** ee hay'adda United Way. Haddii aan luuqaddaada laga helin **2-1-1**, wac **1-800-543-7709**.
3. Wac qadka INFO-U **1-800-525-8636** si aad u maqasho arimo badan oo la xiriira waalidka, loona kala soocay da' iyo mawduuca. Akhbaarta oo Ingiriis ah, taabo 100. Akhbaarta oo Soomaali ah, taabo 400. Koobiga daabacadda waxaa laga heli karaa internetka markaad teybgareyso cinwaanka [www.extension.umn.edu/info-u](http://www.extension.umn.edu/info-u). Adeeggaan waa lacag la'aan waxaana bixiya University of Minnesota Extension Service 24 saac maalin walba, 7 maalmood asbuucii.



# Hirgelinta

Orijinaalka qaybta Ingiriiska ah ee *Tarbiyeynta Wanaagsan: Hagaha Waalidka* waa qayb ka mid ah Qorshaha Waalidnimada Wanaagsan ee Ilmaha Caafimaad qaba ee Children's Hospitals and Clinics, waxaana lagala kaashaday University of Minnesota Extension Service.

La taliyaha Mashruuca:  
Rose Allen, Ku-xeel-dheere arimaha qoyska,  
University of Minnesota Extension  
Service

Qoraa:  
Tracy Habisch-Ahlin, La taliye

Kooxda Tifatiridda:  
Audrey Anderson, Maareeyaha isgaarsiinta,  
Children's Hospitals and Clinics  
Mary Braddock, MD, Agaasimaha caafimaadka,  
caafimaadka bulshada iyo ka hortagga cudurada,  
Children's Hospitals and Clinics  
Colleen Gengler, Ku-xeel-dheere arimaha  
qoyska, University of Minnesota Extension  
Service  
Sharon Hills-Bonczyk, Maareeye, arimaha  
qoyska, Children's Hospitals and Clinics  
Karin Ihnen, Baritaanka adeegga gobolka,  
University of Minnesota Extension Service  
Becky Hagen Jokela, Baritaanka adeegga  
gobolka, University of Minnesota Extension  
Service  
Mary Anne Mathews, Ku taqasusay caafimaadka  
bulshada, Children's Hospitals and Clinics  
Elizabeth Myhre, Agaasimaha caafimaadka  
bulshada iyo ka hortagga cudurada,  
Children's Hospitals and Clinics

Ronald Pitzer, Ku-xeel-dheere adeegga qoyska  
(hawl-gabay), iskuulka adeegga bulshada, Kuleejka  
arrimaha dadka, University of Minnesota

Qoraalka daabacaadaan waxaa laga soo xigtay Positive  
Parenting I and II, University of Minnesota Extension  
Service, 1997, laga soo aruuriyey akhbaaraha iyo  
aqoonta dadka eegay daabacadaas, iyo talada waalidka.

*Tarbiyeynta Wanaagsan: Turjumidda Hagaha Waalidka*  
oo Soomaali ah waxaa hirgeliyey

Maareeyaha Mashruuca:

Mary Anne Mathews, Ku taqasusay caafimaadka  
bulshada, Children's Hospitals and Clinics

Xiriiryeyaasha Mashruuca:

Rose Allen, Ku-xeel-dheere arimaha qoyska,  
University of Minnesota Extension

Audrey Anderson, Maareeyaha isgaarsiinta,  
Children's Hospitals and Clinics

Particia Stoppa, University of Minnesota  
Extension Service

Habka farshaxanka:

Jim Mesick

Turjume:

Adan Mursal

La taliye & Tifa-tire:

Mursal Khaliif

Waxaa mahadnaq gaara ah mudan Somali American  
Friendship Association (SAFA) iyo Faysal Omar,  
Agaasimaha Idman, doorkii ay ka qaateen turjumidda  
buugan.

Sida loo dalbado:

Buugaan waxaad ku heli kartaa Ingiriis,

*Positive Discipline: A Guide for Parents*

Hmong, *Txoj Kev Pab Rau Cov Niam Txiv*

*Cob Qbia Kom Me Nyuam Coj Zoo*

Somali, *Tarbiyeynta Wanaagsan: Hagaha Waalidka*

Spanish, *Enseñando a crecer; una guia para padres*

Hadaad dooneysyo koobiyaal kale ee daabacadan,  
wac University of Minnesota Extension Service

**1-800-876-8636** weydiina sheyga

HE-MI-07461 English

BU-08094 Hmong

BU-08095 Somali

BU-08093 Spanish

Daabacaaddan waxaad ku heli kartaa  
qaab kale, hadaad codsato. Fadlan soo wac  
**1-800-876-8636.**

Wixii faahfaahin ee ku saabsan waalidnimada,  
booqo:

[www.childrenshc.org](http://www.childrenshc.org)

ama

[www.parenting.umn.edu](http://www.parenting.umn.edu)

Xuquuqda daabacaada ©2004 (copyright), waxaa  
iska leh gudiga maamula Jaamacadda Minnesota  
(University of Minnesota). Xuquuqda iyaga ayey  
gaar u tahay.

Jaamacadda Minnesota iyo Children's Hospitals  
and Clinics waa wax bare iyo shaqaaleeye loo  
siman yahay.

60

Qarashka turjumidda iyo daabacaadda *Tarbiyeynta*  
*Wanaagsan: Hagaha Waalidka* waxaa bixiyey:  
Ramsey County Children's Mental Health  
Collaborative  
University of Minnesota Extension Service  
Children's Hospitals and Clinics  
Qarashkii aasaaska buugaan *Tarbiyeynta*  
*Wanaagsan: Hagaha Waalidka* waxaa hirgaliyey  
Target Stores.

*Tarbiyeynta Wanaagsan: Hagaha Waalidka waa qayb ka mid ah Qorshaha Waalidnimada Wanaagsan ee Ilmaha Caafimaadka qaba ee Children's Hospitals and Clinics, waxaana laga kaashaday University of Minnesota Extension Service.*



Minneapolis/St. Paul, Minnesota



BU-08095  
6/04 1M